

Kaalmo-dhaqaaleed

Warbixinta Dowladda hoose ee degmada Tranås

TRANÅS KOMMUN
SOCIALTJÄNSTEN

Yaa xaq ku leh qaadashada kaalmo-dhaqaaleedka?

Xaq u yeelanshada qaadashada kaalmo-dhaqaaleedka, wuxuu ku xusan yahay Xeerka adeegga bulshada. Haddii qofku ama qoyskiisa usan lahayn karti dhaqaaleed wuxuu Dowladda hoose ka codsan karaa kaalmo-dhaqaaleed. Waa kaalmo ku salaysan hadba baahida codsadeha. Teeda kale, waa in qofku u ku dadaala sidii u isugu filnaan lahaa dhinaca dhaqaalaha, sida u helo daqliga shaqada ama kaalmada sida lacagta bukaanka [sjukpenning], gunnada khasnadda caymiska shaqolaaweyaasha [a-kassa], Kaalmo-dhaqaaleedka kirada [bostadsbidrag], kaalmo-dhaqaaleedka carruurta [barnbidrag], taageero-dhaqaaleedka masruufka [underhållsstöd].

Waalidiinta ayaa masruufka carruurtooda ka mas'uul ah, waa haddii weli ay 18 sano buuxsan ama weli aysan dhamaysan dugsiga sare, ilaa ay 21 sano ka buuxsanayaan.

Hantida (lacag bangiga taalo, sami iwm) ama wixii hanti kale ah, oo hab fudud laysaga gadi karo waa in qofku uu iska gada, kaddib ku isticmaala markaas kaddib ayuu xaq ugu yeelan doonaa kaalmo-dhaqaaleedka. Hanti ma guurtada iyo baabuur waxay kamid yihiin hanti saamayn ku yeelan karta xaq u yeelanshada kaalmo-dhaqaaleedka.

Qaadashada kaalmo-dhaqaaleedka waxay ku salaysan tahay shuruudo

Qodobka Xeerka adeegga bulshada ugu muhimsan waxaa weeyaan, in qof kasta u mas'uul ka yahay noolashiisa lana shurudayn karo. Tusaale, haddii qofku usan wax shaqo lahayn waa in uu isku qora Xafiiska Shaqada. Macnaha isku qorida Xafiiska Shaqada waxaa weeyaan, in qofku u hab firfircoon shaqo u raadsado. Teeda kale, waa in uu aqbala wixii talo ah ee ku saabsan shaqo ama waxkaqabadyo kale. Haddii usan qodobadaas tixgelin kuma talo geli karo in kaalmo-dhaqaaleed la siiyo.

Maamulka adeegga bulshada wuxuu qofku ku amri karaa in uu ka qaybgalo tababar ama dhaqdhaqaaq kale oo sare u qaadi karo karti-xirfadeedkiisa. Haddii u diido kaqaybgelida dhaqdhaqaaqa noocaas ah, waxaa isagana loo diidi karaa qaadashada kaalmo-dhaqaaleedka ama hoos loo dhigi karaa heerkeeda.

Qofku waa in u caddayn takhtareed haystaa, haddii u xannuun dartiisa usan shaqaysan karin.

Waa maxay macnaha kaalmo-dhaqaaleedka?

Waxaa Xeerka adeegga bulshada, cutubka 4:aad, qodobkiisa 1:aad §, ku xusan in kaalmo-dhaqaaleedka qofka u suurtageliso helida noolol-maalmeed la aqbali karo. Teeda kale, waa in qofku isagoo kaashanaayo kaalmo-dhaqaaleedka u hela nooolo madaxbannaan. Kaalmo-dhaqaaleed wuxuu ka kooban yahay taageerada masruufka iyo ”taageero u ku guto noolol-maalmeedkiisa kale”.

Taageerada masruufka waxay ka kooban tahay laba qaybood:

Dowladda ayaa sannad kasta go'aamisa heer-qarmeedka [riksnorm]. Waa heer ku salaysan baaritaanada sicirada rasmiga ah. Heer-qarmeedka waa in u dabooli karo kharashyada:

» raashinka
» dharka iyo kabaha
» ciyaar iyo wakhtilummis
» waxyaalaha maalinlaha la adeegsado
» caafimaadka iyo nadaafadda
» wargeysyada maalinleha, taleefan iyo kharashka shatiga telefiishanka

Teeda kale, qofku wuxuu xaq ku lahaan karaa kharashyada dhabta ee kale, waa haddii ay caqligal yihiin. Tusaalooyinka kharashyadaas waa:

» guriga
» korontada guriga
» socdaalada shaqada
» caymiska guriga
» kharashka ururka shaqaalaha iyo Khasnadda caymiska shaqolaaweyaasha

Qofkuu wuxuu kaloo xaq ugu lahaan karaa taageerada laysaga bixiyo kharashyada kale, kuwaasoo la oran karo waa muhim laakin aan maalin kasta loo baahnayn, Tusaale ahaan waxay noqon karaan:

» qalabyada guriga
» daryeel-caafimaadeedka takhtarka/daawo
» daryeel-caafimaadeedka ilkaha
» muraayadda indhaha/okiyaale

Baaritaan

Kaddib markii u qofku kaalmo-dhaqaaleedka codsado, wuxuu maamulku ku dhaqaaqaqa baaritaan ballaaran. Waxaa lays garab dhigayaa baahida qofka iyo daqliga soo gala. Sidaas awgeed, waa in qofku u qoraallo ku caddayn karo dhammaan wixii daqli ah ee soo gala iyo wixii kharash ah ee aan ka tirsanayn heer-qarmeedka. Haddii qofku u qoys leeyahay waa in xubnaha qoyska ay sidaasoo kale u soo caddeeyaan daqliyadooda iyo kharashyadooda. Warbixin been-abuur ku salaysan waxay sababi kartaa in qofku boolis lagu dacweeyo.

Maamulka adeegga bulshada wuxuu xaq ku leeyahay in u warbixin qofka ku saabsan ka codsado Khasnadda caymiska bulshada, Hey'adda hawlgabka, Hey'adda canhuuraha, Guddiga arrimaha waxbarashada, Xafiiska Shaqada iyo Khasnadda caymiska shaqolaaweyaasha (Cutubka 11:aad § Xeerka adeegga bulshada).

Qofku wuxuu xaq ku leeyahay in la wargeliyo waxa ku qoran qoraalka baaritaanka isga ku saabsan. Sidaasoo kale, wuxuu xaq ku leeyahay in u maamulka wargeliyo wixii sax aan ahayn.

Go'aan

Go'aanka Kaalmo-dhaqaaleed waxaa caadi ahaan gaaro gacanhaayeha baaritaanka codsiga sameeyay. Ka arrinsashada arrinta waxay qaadan kartaa ilaa tobban maalmood shaqo, waa haddii aysan jirin wax qabyo ah.

Haddii qofku usan ku qanacsanayn go’aanka

Qofkii aan go’aanka diidmada ku qanacsanayn wuxuu ka qaadan karaa rafcaan (dacwo). Waa in saddex toddobaad gudahooda u qofku rafcaanka oo qoraal ah soo qorta, tiriskaas oo laga soo bilaabo maalinta go’aanka la wargeliyay. Waa in qoraalka rafcaanka loo keena Maamulka adeegga bulshada. Waxaa qofka arrintaas ka caawini karo gacanhaayehiisa haddii usan aqoon u lahayn sida rafcaanka loo qoro.

Lacag bixinta

Lacagaha kaalmo-dhaqaaleed waxaa lagu shuba xisaab bangi, ama xisaabaha loo yaqaanno [postgiro] iyo [bankgiro] iwm. Lacag bixinta waxay caadi ahaan qaadataa hal maalin oo aan ahayn maalin fasax.

Tixgeliyaan sirta xirfada

Qofka qaata kaalmo-dhaqaaleedka waxaa laga diiwan geliyaa Maamulka adeegga bulshada laakinse waa arrin ku salaysan xajinta sirta xirfada. Dhammaan hawlwadeneyada Maamulka adeegga bulshada waxay tixgeliyaan xajinta sirta xirfada. Marna looma oggola in warbixin-shaqsiyeedka qofka ay siiyaan qof/cid aan shaqo ku lahayn, iyadoo oggolaansho laga haysan qofka arrinta ay khuseeyso.

Talo-bixinta daynta iyo miisaniyad-shaqsiyeedka

Qofku wuxuu heli karaa talo-bixinta daynta iyo miisaniyad-shaqsiyeedka. Waa in horranteeda u ballan qabsada isagoo adeegsanaayo khadka taleefanka ee Dowladda hoose Eksjö

0381-360 00. Adreeska booqashada waa

Eksjö kommunhus

Södra Kyrkogatan 4,

575 80 Eksjö.

Xiriirka

Xafiiska soo-dhowaynta Maamulka adeegga bulshada tal. 0140-681 36
E-mail: socialtjansten@tranas.se

Adreeska booqashada: Storgatan 22, albaabka wuxuu ku ag yaalaa maktabada

Xafiiska soo-dhowaynta wuxuu furan yahay isniin-jimce,

Saacadaha 8:30 -12:00 iyo saacadaha 13:00 -15:30

Gacanhaayeha adeegga bulshada waxaa lagala xiriiri karaa

tal. 0140-681 36 saacadaha isniin-jimce 8:30 - 9:30

Maamulka adeegga bulshada waxaa kaloo lagala xiriiri karaa taleefanka guud ee Dowladda hoose degmada Tranås 0140-681 00

Codsi cusub:

Isniin-jimce, saacadaha 8:30-9:30, tal. 0140-686 80.

Adreeska boostada

Tranås kommun
Socialtjänsten
Individ- och familjeomsorgen
573 82 Tranås

Informationen i denna folder gäller fr.o.m. 2015-01-01